



2007 Golaha Dib U Eegista Hannaanka Mas'uulahaanshaha Booliska

WAR BAAHIN

In Durbadii la Baahiyo

Jannaayo 29, 2008

Xiriirka: Garsoore Terrence Carroll, ret., 206-223-1669
carroll@jdrllc.com

**GOLAHA DIB U EEGISTA HANNAANKA MAS'UUL-
AHAANSHAHA BOOLISKA WAXAY SOO SAAREEN
WARBIXINTII UGU DANBEYSEY**

Goluhu wuxuu soo jeediyey 29 talooyin in horumar iyo sii xoojin afarmeelood lagaga sameeyo hannaanka mas'uulida boolisk ee Seattle.

Maanta Seattle, ka dib markay muddo toddobba bilood ah shaqada wadeen, Guddiga naqtiinka la xisaabtanka Booliska ee 2007, oo uu guddoominayey Garsoore Terrence Carroll, ayaa wada jir waxay u soo saareen warbixintii ugu danbeysey. Guddigu waxay ku soo gebagebeeyeen in la sii wado qaabka guud ee dib u sixida Booliska ee Seattle oo lagu daro Maareeye, Hantidhawr iyo Guddida naqtiinka oo rayid ah. Guddigu waxay ugu danbeyntii oggaadeen dhammaan seddexda qaybood inay door weyn ka ciyaaraan habka kala socodsiiinta naqtiinka qalad sixida. Guddigu sidoo kale waxay oggaadeen in hadda hannaanka jirra ee la xisaabtanka Boolisku siyaabo badan qiimo ugu lee yahay ama wax ka beddelo xagga dhiirrigelinta habka geeddi-socodka ee dacwooyinka dadweynaha.

Guddigu waa sameeyeen, Hase yeeshee, meel u hel dib u habaynta una soo bandhig Duqa Magaalada Greg Nickels 29 talooyin oo kaas ah, kuwaas oo wax ku kordhinaya ama sii xoojinaya hannaanka la xisaabtan booliska oo ay ka mid yihiin afarta qaybood oo soo socda:

- La xisaabtan iyo Kalsoonida dadweynaha
- Madaxbannaani
- Asluub Xirfaddeedka
- Waadaxnimo

--dheeraad--

“Dhawr bilood ka bacdi markay dhegeysiyadii dadweynaha iyo ka baaraandeg sameeyeen, waxay kooxdan Guddida rayidka kala duwan ah, isku afgarteen inay si wada jir ah u soo jeeddiyeen 29 talooyin kuwaas oo dhidibada u aasi doona hannaankii hore ee la xisaabtanka ee Booliska”, Carrol waxay tiri. “Waxan si xoog ah uga doodnay in Duqa Magaalada, Guddiga, Waaxda Booliska iyo Wakiilada ururadu ka wada shaqeeyaan dhammaan arrimaha muhiimka ah, oo ku saabsan habka la xisaabtanka iyo dhaqan celinta Booliska. Waxan aad ugu mahad celinaynaa kuwa noo soo gudbiyey waxbixinada iyo ra'yigooda taas oo ku tusaysa muhiimada ay u lahayd in guddigu shaqadooda dhammaystiraan”.

“Gebi ahaan sida la xisaabtanka Waaxda Boolisku muhiim u tahay ayey tan asluubeynta sarkaal kastana u tahay, maxaa-yeelay kuli iyagu waa isku xiran yihiin. Labaduba aad ayey muhiim ugu yihiin xagga fiyoobida Waaxda iyo aaminaada bulshadu u hayso Booliska”, waxa yiri Bob Boruchowitz, oo ah Guddoomiye ku xigeenka iyo barafasoorka cilmiga sharciyada ee Jaamacada Seattle. “Naqtiinka qiimaynta ee sannadkiiba la qabto, oo aan ku talinay in Booliska, Siyaasadaha iyo ku dhaqankooduba ka bilaabmo in Waaxda Boolisku dhexgalo la sameyso dadka madow, waxay taasi keeni doontaa warbixino iyo fekredo ka caawimi doona si ka fiican sida Boolisku shaqadooda u qabtaan, waxayna taasi sii kordhinaysaa aaminaada bulshada”.

“Talooyinka guddidan soo jeeddiyeen ayaa ah, lagama-maarmaan in la hubiyo kor u qaadista madaxbaannida, waadaxnimo iyo mas'uuliyada la xisaabtanka ama soo jiidashada kalsoonida dadweynaha. Gaar ahaan, in la xoojiyo madaxbaannida labada Hantidhawrka OPA iyo Maareeyaha OPA kuwaas oo si cad wax uga beddelaya hannaanka wax qabadka ee hadda jira”, Waxa yiri Pramila Jayapal, oo ah xubin ka tirsan Guddiga iyo madaxa maaraynta ee ka xoroobida nacaybka xaafaddaha (Hate Free Zone).

Talooyin Guddigu ay xooga saareen waxa ka mid ah kuwan soo socda:

- Sii ballaarinta jagada Hantidhawrka ee xafiiska la xisaabtan Booliska (OPA);
- Kordhinta Madaxa-bannaanida awooda Maareeyaha Xafiiska la xisaabtan ee Booliska (OPA);
- Hirgelita Guddiga naqtiinka OPA oo ah furaha xiriirka ee bulshada;
- Weyneynta inay helaan dadweynuhu warbixinada ku saabsan hannaanka mas'uulida la xisaabtanka;
- Sii haynta heerka sare ee qaynuunda khibradeed; iyo
- Kor u qaadista wada shaqaynta iyo maammulka OPA oo dhan.

--dheeraad--

Bishii June 2007, ayuu Duqa Magaalada Greg Nickels u magcaabay 11-xubnood oo guddi ah, inay dib u eegid buuxda ku sameeyaan hannaanka mas'uuliyad-ahaanshaha ee Booliska Seattle. Golaha la xisaabtan Boolis waxay shaqadoodii dhammaystireen Jannaayo 2008.

Xubnaha Guddigu waxay ahaayeen: Garsoore Terrence A. Carroll, ret., Guddoomiye; Bob Boruchowitz, Guddoomiye ku Xigeen; Jenny A. Durkan; Lorena González; Pramila

Jayapal; Gary Locke; Hubert G. Locke; Judith Krebs; Mike McKay; Norman B. Rice; iyo Jennifer Shaw.

Qaabka kor ka ilaalinta ee booliska Seattle's waa mid aad qaayo weyn. Habka ama siistamka Seattle ee hadda jira wuxuu shaqaynayey muddo lix sanno ah, wuxuu kaloo leeyahay saddex qabood oo kala duwan:

- Xafiiska khibrada mas'uul-ahaanshuhu, wuxuu ka mas'uul yahay, helitaanada iyo baaritaanada dacwooyinka xaddguddubka ah iyo talooyin u soo jeeddinta Guddoomiyaha Booliska;
- Hantidhawrka OPA, wuxuu ka mas'uul yahay hubinta dhammaan faylasha dacwooyinka, dib u daalacashada iyo talooyin ka soo jeeddinta baaritaanada socda; iyo
- Guddiga dib u hubinta ee , wuxuu ka mas'uul yihiin dib u eegis habka geeddi-socodka dacwooyinka OPA iyo xalinta muranka ka dhex jira Hantidhawrka iyo Guddoomiyaha Booliska.

Maareeyaha OPA waxaa magcaabay Duqa Magaalada iyo guddiga oo ansixiyey. Sida sharciga Magaaladu dhigayo, Maareeyaha OPA wuxuu jaggada hayn karaa ilaa muddo lix sanno ah. Duqa Magaaladu waxaa kale oo uu magcaabay, una xil saara in goluhu ansixiyo, Hantidhawre, kaas oo ah qandaraasle madax-bannaan oo rayid ah. Sida uu dhigayo sharciga Magaaladu, Hantidhawrayaasha OPA waxay hawsha sii hayn karaan ugu badnaan labo ilaa saddex sanno. Golaha naqtiinku waa saddex xubnood oo wadanguddi rayid ah, waxana sameeyey oo magcaabay Guddiga Magaalada.

Koobbiga warbixinta koobban ee madaxda wuxuu la socdaa warsaxaafadeedkan. Koobbiga warbixinta guddiga oo dhan waxa laga yaabaan inaad ka guurin kartid ama ka nuqullan kartid shebbekeda internet ee golaha oo ah:

<http://www.seattle.gov/policeaccountabilityreviewpanel/>

###